NAPLAN-KA xaashida – macluumaadka waalidiinta iyo daryeellayaasha

NAPLAN
NATIONAL ASSESSMENT PROGRAM
Literacy and Numeracy

2020

Ilmahaagu wuxuu samayn doonaa imtixaanada NAPLAN-da tests ee 2020

Wasiirada waxbarashada ee Dawlada dhexe, teritoriga iyo Dawlad goboleedku waxay isku raaceen in dhamaan dugsiyadu ka gudbayaan NAPLAN-KA xaashida ku salaysan una gudbayaan NAPLAN-KA online-ka ah si loo siiyo qiimayn sax ah taas oo ah mid aad u hawlgelinaysa ardada.

Hay'adaha waxbarashada territoriga iyo Dawlad Goboleedka ayaa go'aan ka gaari doona marka dugsiyadoodu u wareegayaan online-ka. Qorshaha hadda ahi waa kan ardadu ugu gudbayaan NAPLAN online ah sanada 2021.

Maxay ardadu NAPLAN u sameeyaan?

Barnaamijka Qiimaynta Qaranka – Qoraalbarashada iyo Xisaab-barashada (NAPLAN) waxay qiimaysaa xirfada xisaabarashada iyo qoraal-barashada taas oo muhiim ah ilma walba si uu horay ugu maro xagga waxbarashada iyo nolosha dugsiga.

Ardada sanad dugsiyeedka 3, 5, 7 iyo 9 waxay ka qaybgalaan imtixaanada NAPLAN xagga akhriska, qoraalka, heshiisyada luqada (higaadinta, naxwaha, calaamadaha qoraalka) iyo tira-barashada.

Qiimayntu waxay siisaa waalidiinta iyo dugsiyada fahamka sida arday waliba u shaqaynayo waqtiga imtixaanada. NAPLAN keliya waa mid ka mid ah arrinta qiimaynta dugsiga iyo habka ka warbixinta – ma bedelayso qiimaynta socota oo ay sameeyeen macalimiintu kuna saabsan waxqabadka ardayga.

NAPLAN wuxuu kaloo siiyaa dugsiyada, masuuliyiinta waxbarashada iyo xukuumadaha macluumaad ku saabsan sida barnaamijyada waxbarashadu u shaqaynayaan iyo haddii dhalinyarada australiyaanka ahi ay u gaarayaan natiijooyinka waxbarasho ee muhiimka ah xagga barashada qoraalka iyo barashada xisaabta

NAPLAN maxay qiimaysaa?

NAPLAN waxay qiimaysaa xirfada qoraal-barashada iyo xisaab-barashada ardadu ay ku baranayaan manhajkooda caadiga ah ee dugsiga. Masuuliyiinta waxbarashada aan-xukuumiga ahayn iyo kuwa xukuumiga ahba waxay door ka qaataan horumarinta qalabka NAPLAN.

Ardada waxaa lagu qiimeeyaa hawsha luqad-barashada iyo xisaab-barashada hawsha manhajka iyada oo ku xirnayn in lagu sameeyey online ama warqada. Natiijooyinka online-ka iyo kan warqadaba waxaa loo gudbin karaa isla heerka qiimaynta NAPLAN.

Sidee u caawin karaa ilmahayga inuu diyaar garoobo?

Keli ahaantiisa, NAPLAN maaha imtixaan la bari karo ardada mana laga filayo ardada inay sidaas sameeyaan.

Caawin ilmahaaga inuu diyaargaroobo adiga oo u ta'kiidinaya in NAPLAN uu yahay barnaamij ka mid ah barnaamijkooda dugsiga, adiga oo xasuusinaya inay da'dadaalkoooda ugu fiican sameeyaan.

ACARA kuma talinayso diyaargarow siyaada ah ee NAPLAN ama isticmaalida adeegyada iyaga oo talo siinaya bixiyayaasha.

Macalimiintu waxay ta'kiidin doonaan ardadu inay la qabsadeen noocyada su'aallaha imtixaanka waxayna siin doonaan kaalmada iyo tusaha ku haboon.

Arag tusaalayaasha su'aallaha NAPLAN ee nap.edu.au/naplan

Ka qaybqaadashada NAPLAN

Dhamaan ardada sanadaha 3, 5, 7 iyo 9 waxa laga filayaa inay ka qaybgalaan qiimaynta sanadlaha ee NAPLAN. Ardada leh iinta waxaa laga yaabaa inay mudan yihiin dib-u-habayn ka tarjumaysa kaalmada caadatan lagu bixiyo qiimaynta fasalka. Waxaa waajiba inaad kala hadasho macalinka isticmaalka dib u habayn kasta oo khusaysa ilmaha.

Ilmaha qaba iinta aad u xadadaysa awoodooda ka qaybgelida qiimaynta, ama ardayga dhowaan yimid Australia aana horay ugu hadli jirin English, waa laga yaabaa in la siiyo ka dhaafid rasmi ah.

Maamulaha dugsigaaga iyo mas'uulka imtixaanka goobta ayaa ku siin kara macluumaad badan oo ku saabsan habka bixinta khaaska ah ama habka loo baahan yahay in lagu hello ka dhaafid rasmi ah.

VICTORIAN CURRICULUM AND ASSESSMENT AUTHORITY
VICTORIA State Government
NAP NATIONAL ASSESSMENT PROGRAM
acara AUSTRALIAN CURRICULUM, ASSESSMENT AND REPORTING AUTHORITY

Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu ka maqnaa maalinta la qaadayo NAPLAN-ka?

Markay suurtagal tahay, dugsiyadu waxaa laga yaabaa inay u qaban qaabiyaan ardayda maqnayd marka la qaadayey inay sameeyaan imtixaankay gafeen waqti kale inta lagu jiro jadwalka imtixaanka dugsiga. Arday keligood ah looma ogola inay sameeyaan imtixaanada online-ka ah ee NAPLAN wixii ka dambeeyey 22ka May 2020.

Sidee looga warbixinayaa hawlqabadka ilmahayga?

Ardayga shakhsiga ah hawlqabadkiisa waxaa lagu muujinayaa heerka gudashada qaranka. Natiijada mustawaha ugu hooseeya wuxuu muujiyaa in ilmuhu muujiyey heerka asaaska ah xirfadaha qoraal-barashada iyo iyo xisaab-barashada loog abaahan yahay inay si buuxda uga qaybgalaan heer sanadeedkaas.

Warbixinta ardada shakhsiga ah ee NAPLAN waxaa bixin doona ilmahaaga dugsigiisa sanadka dhamaadkiisa. Haddii aadan helin warbixinta, waxaa waajiba inaad la xiriirto ilmahaaga dugsigiisa.

Jadwalka NAPLAN 2020

Qiimaynta xaashida waxay bilaabataa Talaadada 12ka May waxayna dhamaataa The paper assessment starts on Talaadada 12ka May maalinta Jimcaha 15ka May 2020.

Shuruudahah imtixaanka xaashida hoos ayaa lagu sharxay.

Sidee natiijooyinka NAPLAN loo isticmaalaa?

- Ardada iyo waalidiinta waxaa laga yaabaa inay isticmaalaan natiijada shakhsiyeed si ay ugala hadlaan natiijada macalimiinta.
- Macalimiintu waxay isticmaalaan natiijooyin si loogu iftiimiyo si fiican ardada kuwaas oo ka faaidaysan doona loolanada waaweyn ama kaalmada siyaadada ah.
- Dugsiyadu waxay isticmaalaan natiijooyinka si loo ogaado awooda iyo goobaha si loo wanaajiyo barnaamijyada waxbarida, looguna sameeyo hadafyo xagga aqoonta-qoraalka iyo aqoonta-xisaabta.
- Nadaamka dugsiga wuxuu isticmaalaa natiijooyin si dib loogu eego barnaamijyada iyo kaalmada la siiyey dugsiyada.
- Bulshadu waxay arki kartaa dugsiga caadiga ah natiijooyinka NAPLAN rugta myschool.edu.au

Xaggee macluumaad ka helli karaa?

Macluumaad badan oo ku saabsan NAPLAN:

- La ilmahaaga dugsigiisa
- La xiriir masuuliyiinta hay'ada maamulka imtixaanka nap.edu.au/TAA
- Booqo nap.edu.au

Si aad u barato sida ACARA wax uga qabato macluumaadka shakhsiyeed ee NAPLAN, booqo nap.edu.au/naplanprivacy

Imtixaanka xaashida	Talaadada 12ka May	Arbacada 13ka May	Khamiis 14ka May
Heshiisyada Afka Imtixaankan wuxuu qiimeeyaa higaadda, naxwaha iyo xarakaynta	Sanada 3aad: 45 daqiiqo. Sanada 5aad: 45 daqiiqo. Sanada 7aad: 45 daqiiqo. Sanada 9aad: 45 daqiiqo.		
Qoraalka Ardada waxaa la siiyaa 'dhiirigeliyaha qoraalka' (marmarka qaarkood waxaa loo yeeraa 'muujiye' – fikrad ama mawduuc) waxaana la weydiiyaa in la qoro jawaabta si gaara (qoritaan xigasho ama qancin)	Sanada 3aad: 40 daqiiqo. Sanada 5aad: 40 daqiiqo. Sanada 7aad: 40 daqiiqo. Sanada 9aad: 40 daqiiqo.		
Akhris Ardadu waxay akhriyaa qoraallo kala duwan oo ah macluumaad, mala-awaal iyo qancin waxayna ka jawaabaan su'aallaha xiriirka la leh		Sanada 3aad: 45. daqiiqo. Sanada 5aad: 50. daqiiqo. Sanada 7aad: 65. daqiiqo. Sanada 9aad: 65. daqiiqo.	
Tirabarashada Imtixaanku wuxuu qiimeeyaa tirade iyo Aljabrada, cabiraada iyo jeomitiriga, iyo xisaabaadka iyo ixtimaalka			Sanada 3aad: 45. daqiiqo. Sanada 5aad: 50. daqiiqo. Sanada 7aad: 65. daqiiqo. Sanada 9aad: 65. daqiiqo.